



Dugsiga Hoose ee Sitton ee deeq lacageed oo dhan \$20,000 ka helay shirkad deris ah

Dugsiga Hoose ee Sitton wuxuu helay war weyn oo wanaagsan intii lagu jiray xagaaga: Dugsigu wuxuu deeq lacageed oo dhan \$20,000 ka helay Purdy, oo ah laan ka mid ah Sherwin-Williams.

“Deeqdan lacageed waa ballaarinta iskaashi dheer oo soo jiray oo ka dhexeeya Purdy iyo Sitton, oo ay ku jiraan saacado badan oo tabarucnimo,” ayay sheegtay maamulaha Sitton ee Dana Nerenberg. “Waxaan aad ugu mahad celineynaa fursadan wanaagsan.”

Deeqda lacageed waxay Sitton ka caawin doontaa in ay bixiso lacagta safarada aqoon kororsiga iyo ballaarinta waxyaalaha yaala maktabadda (oo ay ka mid yihiin ku darista buugaag Isbaanish ah oo dheeraad ah) iyo ilaha barnaamijka makerspace.

Abaalmarintu waxay qayb ka tahay barnaamijka Sherwin-Williams’ ee “Color a Brighter Tomorrow” oo lacag deeq ahaan ah bixiya saddexdii biloodba waxaana taageera shaqaalaha Sherwin-Williams ee dalka oo idil. Purdy, qaybta burushka iyo burushka wareega ee shirkadda, ayaa warshad ku leh Waqooyiga Portland, meel qiyaastii laba mayl u jirta Sitton, shirkaduna waxay sii wadaa iskaashi adag oo la leedahay dugsiga.

Tan iyo 2010, shaqaaluhu waxay in ka badan 600 saacadood oo waqtigooda ah siiyeen Sitton -- oo ay ka mid yihiin nadiifinta goobta ciyaarta ee sanadlaha ah, mashaariic dhanka rinjiyeynta ah, iyo tabaruc uga shaqeynta bandhiga gu’ga ee sanadlaha ah ee dugsiga, ayay sheegtay haweenayda afhayeenka ah ee Megan Bernand. “Waxay iskaashi dhab ah la leeyihiin Sitton, iyada oo shaqaale badan, oo ay ku jiraan carruurtooda iyo kuwa ay owoowga/ayeeyda u yihiin, ay dugsiga dhigteen.”